# Daryeelka ilkaha iyo Caafimaadka loogu talagalay dadka magan galyo doonka ah

SOMALISKA

## Haddii aad xanuunsato

Wac xarunta caafimaadka haddii aad u baahantahay daryeel. Dakhtarada iyo kalkaaliyaasha ee xarunta caafimaad waxay inta badan daaweyn karaan dhaawacyada iyo jirooyinka. Waxaa laguu gudbin doonaa isbitaal haddii ay lagama maarmaan noqoto. Xarunta caafimaadka waxay furantahay Isniin illaa iyo Jimce laga bilaabo 08:00 illaa iyo 17:00. Wac 1177 haddii aad u baahato tallo. Adeeggan waxaa lahelayaa 24/7 (labaatan iyo afar saac todobada maalin ee asbuucii). Waxaad tallo caafimaad ka heli doontaa kalkaaliyaasha kuwaas oo kuu sheegi doona waxa aad sameyni lahayd . Kalkaaliyaasha waxay ku hadlaan luuqada Iswidhishka iyo Ingiriisiga.

### Haddii aad xanuunsato inta lagu guda jiro fiidka iyo dhammaadka todobaadka

Qaar kamid ah xarumaha caafimaadka waa kuwo furan inta lagu guda jiro fiidka iyo dhammaadka todobaadka. Kuwaan waxaa lagu magacaabaa xarumaha heeganka daryeelka xaaladaha degdega ah (jourcentraler). Xarumaha daryeelka xaaladaha degdega ah waxay ku kala yaaliin gudaha Eksjö, Jönköping iyo Värnamo. Waxayna furan yihiin laga bilaabo 17:00 illaa 22:00 inta lagu guda jiro fiidka iyo laga bilaabo 10:00 illaa 22:00 dhammaadka todobaadka. Wac 1177 kadibna waxaa laguugu xirayaa xarunta daryeelka ee xaaladaha degdega ah haddii loo baahdo.

### Shillalka halista ah ama xanuunadao

Haddii aad u xanuunsantahay si halis ah ama si halis ahi ugu dhaawacantay shil, waxaad caawimaad ka heli kartaa waaxda shilka iyo xaaladaha degdega ah. Waaxyada shillalka iyo xaaladaha degdega ah waxaa laga heli karaa isbitaalada ku kalayaala gudaha Eksjö, Jönköping iyo Värnamo. Waxay furan yihiin 24/7 (labaatan iyo afar saac todobada maalin ee asbuucii). Wac lambarka xaalada degdega ah 112 si aad ugu wacdid ambalaas haddii adiga ama uu qofkale u baahanyahay daryeel xaalad degdeg ah.

### Haddii uu ilig ku xanuunayo

Wac dhakhtarka ilkaha wixii kusaabsan daryeel ilko degdeg ah. Xaaladda degdega ah waxaa loola jeedaa/laga wadaa marka qof uu si lama fillaan oo daran iliga u xanuuno , cudur/caabuq daran ama uu dhib kasoo gaaray shil.

### Ilmaha/caruurta ama dhallinyarada magan galyo raadis ah

**Daryeelka caafimaadka**

Daryeelka caafimaadka waa mid lacag la'aan u ah caruurta iyo dhalinta da`da yar-yar ee da'doodu kayartahay 20 sanno jir. Daaweynta isbitaalka sidoo kale waa mid lacag la'aan ah.
Caruurta aan weli bilaabin iskuulka waxay la kulmi doonaan kalkaaliso iyo dhakhtar u qaabilsan caafimaadka caruurta kuwaas oo jooga xarunta/rugta/laanta caafimaadka ilmaha.
Caruurta bilaabay iskuulka waxay iskuulka kula kulmi doonaan kalkaalisada iskuulka ama dhakhtar.

**Daryeelka ilkaha**

Caruurta iyo dhallinta yar-yar ee da'doodu kayartahay 18 sanno jir waxay xaq u leeyihiin in ay kubooqdaan dhakhtarka ilkaha si lacag la'aan ah.

### Dadka waaweyn ee magan galyo raadiska ah

**Daryeelka caafimaadka**

Laga bilaabo maalinta ay da'daadu buuxiso/noqoto 20, kaliya waxaad xaq u leedahay daryeelka ilkaha iyo caafimaadka xaaladaha degdega ah, iyo daryeelka aan lasugi karin. Daryeelka xaaladda degdega ah waa marka aad u xanuunsatid si halis ah ama aad si halis ahi ugu soo dhaawacantay shil. Qofka aad daryeelka karaadinaysid ayaa go'aamin doona haddii daryeelkaaga lasugayo ama haddii aan lasugaynin.
Booqashada labooqdo dhakhtarka qiimaheedu waa SEK 50. Booqashada labooqdo shaqaale daryeel caafimaad kale qiimaheedu waa SEK 25.
Daaweynta isbitaalka waa mid lacag la'aan ah.

Region Jönköpings län

### Daryeelka ilkaha

Rugta/Meesha dhakhtarka ilkaha, waxaad tahay qof weyn laga bilaabo maalinta ay da'daadu buuxiso/noqoto 18. Dadka waaweyn kaliya waxay xaq u leeyihiin daryeelka ilkaha xaaladda degdega ah. Middaan qiimaheedu waa SEK 50.

### Daryeelka caafimaadka dumarka/haweenka

Haweenka uurka leh waxaa u haboon in ay la xiriiraan adeeg daryeelka caafimaadka si ay u helaan caawimaad iyo tallo.
Adeeggan waa mid lacag la'aan ah.

#### Xaqa aad u leedahay turjumaan

Haddii aadan garaneyn/fahmin luuqadda Iswidhishka, waxaad xaq u leedahay caawimaad turjumaan marka aad booqatid xarunta daryeelka caafimaadka ama dhakhtarka ilkaha. Adeeggani waa mid lacag la'aan ah. Fadlan sheego ka hor booqashadaada haddii aad u baahantahay turjumaan. Turjumaanka waa mid xefdiya/ dhowra xogta xaaladaada j.

### U socdaalka xarun daryeelka caafimaad

Haddii aad degan tahay meel kafog xarunta caafimaadka ama isbitaalka, waa in aad marka hore isku daydaa in aad raacdo tareen ama bas, ama kacodso in qof uu kusoo qaado. Haddii ay xaaladaadda caafimaad macnaheedu tahay in aadan safri karin keligaaga, waxaad caawimaad sii socod iyo soo laabasho safarka kaheli xarunta daryeelka caafimaadka. Daryeel bixiyaha ayaa go'aansan doona haddii aad caawimaada qaadanaysid iyo haddii aadan qaadanaynin. Laxiriir daryeel bixiyaha haddii aad u baahantahay caawimaad.
Wac 112 haddii aad u xanuunsantahay si halis ah ama u dhaawacan tahay islamarkaasna u baahantahay daryeel xaalad degdega ah.

## Baaritaan caafimaadka goorta uu qofku markaas soo galo dalka Iswidhan

Waa in aad sameysaa baaritaan caafimaad goorta i aad soo gasho/cagadhigato dalka Iswidhan. Adeeggan waa mid lacag la'aan ah. Waxaad la kulmi doontaa dhakhtar ama kalkaaliso kuwaas oo baaritaan kusamayni doona xaaladda caafimaadkaaga. Dhammaan dadka waaweyn iyo caruurta waxaa khasab ku ah in ay sameeyaan baaritaan caafimaad.
Dhakhtarka ama kalkaalisada uma sheegi doonaan qofna arrimaha/waxa kusaabsan xaaladda caafimaadkaaga - kaliya adiga unbaa oggaan doona.

## Kaarka LMA

Marwalba waa in aad tustaa ama muujisaa kaarkaaga aqoonsi LMA ama warqadda cadeynta magan galyo doonka marka aad booqanayso xarunta daryeelka caafimaadka ama dhakhtarka ilkaha.
Kaarka ama rasiidka waa adiga AQOONSIGAAGA, middaas oo ay khasabtahay in aad isticmaasho marka aad sugeyso sharciga oggolaanshaha .Haddii aad qaadatay sharciga oggolaanshaha , waxaad haysanaysaa kaarka LMA ilaa iyo inta aad ka diiwangashan tahay Hay`adda /Wakaalada Socdaalka.

### Wixii macluumaad dheeri ah kafiiri boggaan internetka ah www.1177.se

• Daryeelka ka jira gudaha dalka Iswidhan haddii aad tahay qof magan galyo doon ah, dhuumanaya ama haysan wax cadayn ah
• Lataliyaha daryeelka-caruurta, luuqado kale

## Lambarada teleefoonka iyo cinwaanada

Bogga xiga waxaad ka heli doontaa cinwaanada iyo lambarada teleefoonka loogu talogalay adeegga daryeelka caafimaadka aad u baahantahay.

## Khadka caawimaada loogu talagalay caruurta keligooda ah

• Wac 0200-77 88 20
• Waxay furantahay maalmaha todobaadka 15:00 illaa 18:00
• Luuqadaha: Ingiriisi, Dari, Carabi
• Wicitaanku waa mid lacag la'aan ah.
• Waxaad ahaan kartaa qof qarsoon.